



Garda Síochána waxey ku faraxsan tahay iney ku dhawaaqdo Warbixinta Internetka ee Dembiyada Nacaybka oo laga heli karo [www.garda.ie](http://www.garda.ie).

Haddii aad tahay dhibbane ama goobjoog u tahay dhacdo u baahan fiiro gaar ah Garda - wac isla markiiba 999 ama 112.

## Maxaan uga jeednaa Dembiyada Nacaybka?

Iyadoo lagu saleynayo qeexitaanka An Garda Síochána [Hate Crime](#) - waxaad noqon kartaa dhibane dambi nacayb ah hadii lagugula kacay fal dambiyeed sida Weerar, Dhibaateyn ama Amarka Dadweynaha oo aad rumeysan tahay in laguu bartirmaameedsaday da'daada awgeed, curyaanimo, midab, dhalasho, qowmiyad, diin, nooca jinsiyadaada. Kuwaas waxaa lagu magacaabaa astaamo la ilaaliyo.

## Maxaan uga jeednaa Dhacdooyinka Nacaybka?

Dhamaan dhacdooyinka ku lug leh Nacaybku ma noqon doonaan fal dambiyeed. Wuxaan ugu yeernaa Dhacdooyinka Nacaybka ee aan dembiyada lahayn. Dhacdooyinka Nacaybka ee aan ku jirin waxaa ka mid noqon kara dhacdooyinka heerka hoose ee Takoorka, Xoog u sheegashada, ku xadgudubka internetka ama af xumeynta. Waxay muhiim u tahay inaad adigana noo soo sheegto Dhacdooyinka Naceybka Aan Dembiga aheyn.

## Kawaran haddii aanan haysan caddayn taageersan?

Ha welwelin. Uma baahnid inaad haysato caddayn taageeraya si aad warbixin noogu soo gudbiso adiga oo sidaa sameeya, naftaada iskuma xilsaarayso inaad qaaddo tallaabo dheeraad ah.

- Waanu dhagaysan doonaa waxaad leedahay
- Wuxaan diiwaangelin ka sameyn doonaa dhacdada
- Wuxaan kaala hadli doonaa xulashooyinka jira oo aan kugula heshiin doono iyo sida ugu wanaagsan ee loo sii wadi karo

## Maxaa Naceybka loo soo warbixiyaa?

Ka warbixinta Dembiyada Nacaybka ama Dhacdooyinka Nacaybka waxay naga caawin doontaa inaan fahamno waxa kugu dhacay iyo jawaabta aad u baahan tahay. Waxay sidoo kale noo sheegi doontaa halka ay ka dhacaan dhacdooyinka noocan ah iyo inta jeer. Tani waxay naga caawin doontaa inaan dadka ka dhigno kuwo ammaan ah iyadoo la siinayo jawaab-celin wanaagsan oo booliis.

**Make Hate Crime Visible – Report it Today #LetsStopHateTogether**

An Garda Síochána

